

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF.JSL/M/XERM/249-893/012012

DATE24/01/12.....

XEER MADAXWEYNE No: 0194/012012

**Aasaasidda Xafiis Xidhiidhiya Hawlaha Ka Hortagga Budhcad
Badeedda**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Golaha ammarka ee qaramada midowbey ee ku saabsan iskaashiga ka hortaga budhcad badeedda;
- Markuu Ku Qancay: In ay budhcad badeedu saameyn ku leedahay noolasha muwaadiniinta Somaliland;
- Markuu Qadariyey: Ahmiyada ay leedahay wada shaqeynta aynu beesha caalamka la leenahay ee ka hortaga budhcad badeedda;


Wuxuu Go'aansaday

In la asaaso Xafiis Xidhiidhiya Hawlaha Ka Hortagga Budhcad Badeedda.

Xafiiska Xidhiidhiya Hawlaha Ka Hortagga Budhcad Badeedda waxa u noqonaya barnaamij uu hogaamiyo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda oo kaashanaya Guddiga Hawlaha ka Hortagga Budhcad Badeedda heer qaran ee hoosta ku qeexan.

Guddida Ka Hortagga Budhcad Badeeddu oo Guddoomiye u noqonaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda, wuxuu ka koobnaan doona:

- Xeer Ilaaliyaha Guud (Guddoomiye Ku Xigeenka Koobaad).
- Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha (Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad).
- Taliyaha Ciidanka Asluubta.



- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda.
- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda.
- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.
- Maareeyaha Dekedda Berbera.

Guddida ka Hortagga Budhcad Badeedda waxa Xoghayn u noqonaya Xidhiidhiyaha Guddida Ka Hortagga Budhcad Badeedda.


Madaxweynaha JSL wuxuu Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda u igmadey xulista iyo magacaabista cidda maamulaysa Xafiiska Xidhiidhinta Ka Hortagga Budhcad Badeedda iyo fulinta hawlaha Qaranka ee ku wajahan ka hortagidda budhcad badeedda.

Waajibaadka Xafiiska Xidhiidhinta Ka Hortagga Budhcad Badeedda:

- Maareynta Hawlgelinta (Operational Management) hawlaha ka hortagga budhcad Badeedda.
- Xidhiidhiinta Tiirarka (Pillars) ka Hortagga Budhcad Badeedda (*Xeer Ilaalinta, Cadaaladda, Ciidamada Ilaalada Xeebaha, mashaariicda horemarineed ee degaan xeebaha iwm*).
- Xidhiidhiinta diyaarinta Qorshe Hawleedka Qaran ee ka hortagidda iyo xalinta mushkilada budhcad-Badeedda.
- Hawlgalinta mashaariic xalisa sababaha budhcad badeedu u sameysanto.
- Raadinta dhaqaale lagu xaliyo mushkilada budhcad Badeedda oo ay u baahanyihiin Tiirarka Barnaamijka ka Hortagga Budhcad Badeedda.
- Qorista iyo diyaarinta warbixinaha iyo talo-bixinta ka hortagga budhcad badeedda.
- Ururinta iyo keydinta xogaha la xidhiidha budhcad badeeda iyo ka hortageeda.

Dhamaan Wasaaradaha iyo Ha'yadaha Dawliga ah waxa la faraya in ay ka gutaan waajibaadkooda la xidhiidha wada shaqeynta Xafiiska Xidhiidhiinta Ka Hortagga Budhcad Badeedda.

Allaa Mahad Leh,


Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

